

Sameyso qalabkaaga la adeegsado marka duufaantu jarto Korontada



Iyada oo ay kuxiran tahay xaaladaha cimilada iyo waxyaabaha kale ee ku saameyn karo, marka lagu jiro waqtiyada ay duufaantu dhaceyso ayaa ay korontada iyo adeegyada kaleba ay go'naan karaan saacado ama maalmo badan. Waa inaad haysataa sahay iyo cunto kugu filan oo ay isticmaali karaan qoyskaaga ugu yaraan saddex maalmood. Waxaan soo jeedineynaa inaad ku xafidato sheeyaasha/alaabta meel ama weelal ka ilaalin kara gaaritaanka biyaha iyo jiirka oona dib ubuuxi qalabka aad wax ku keydsato ugu yaraan hal mar sanadkii.

- Tooshka ama madaxyada nalka
- Raadiyaha ku shaqeeya beyteriga ama kuwa gacan qabsiga
- Saacadaha ku shaqeeya beyteriga ama saacadaha caadiga ah
- Beyteriyo dheeraadka ah
- Taleefannada gacanta iyo jaajarada, oo ay kujiraan jaajarada gawaarida
- Biyo, hal gallon qofkiiba maalin walba, gaar ahaan haddii aad ku tiirsan tahay bamka korontada ku shaqeeya ee biyaha
- Cuntooyinka muddo yaali kara iyo qalabka qasacadaha lagu furo, kirliyada, birtaawo iyo maacuun
- Beyteriyada dheeraadka ah ee loogu talagalay haamaha hawada oksijiinta ama qalabka kale ee caafimaadka
- Ciyaaraha miiska, buugaag iyo turub
- Cunto ku karinta banaanka, gaaska foornada si loogu isticmaalo banaanka, oo ay kujiraan shidaal iyo qarxisada lagu daaro ama taraq

Alaabta loogu talagalay gurmada degdega ah ayaa sidoo kale noqon kara kuwo waxtar leh

- Alaab si fudud loo daadgureyn karo sida furayaasha, boorsada gacanta, ookiyaalayaasha, kaararka aqoonsiga, baasaboorada, waraaqaha dhalashada, xogta caymiska, diiwaanada maaliyadda iyo warqada khariirada maabka goobtaada
- Koobiyada daabacan ee qorshaha gurmada degdega ah ee qoyskaaga iyo liiska nambarda lagala xariirayo
- Ookiyaalayaasha, ilko gashiga macmalka ah, qalabka caawiya maqalka, iwm.
- Daawooyinka dhakhtarku soo qoray iyo kuwa farmashiyaha laga soo iibsado, agabka caafimaadka iyo sahayda sida hawada oksijiinta oo dheeraad ah
- Sahayda ilmaha, caanaha iyo/ama cuntada, xafaayada iyo tirtirayaasha nadaafada
- Sahayda xayawaanada la dhaqdo, kuleetiga summada aqoonsiga iyo dacay, cunto iyo biyo, alaabta nadaafadda (sida weelasha qashinka lagu rido) iyo daawooyinka
- Qalabka nadaafada gaarka ah, tirtirayaasha, saabuunta, shaambada/qalabka timaha lagu hagaajiyo, burush/shanlo, daawada ilkaha iyo burushka ilkaha, carfisada, sahayda dumarka iyo ookiyaalayaasha qoraxda laga xidho
- Qalabka gurmada degdega, buuga gurmada degdega, jeermis dilayaasha, faashadaha dhejiska leh, sharootada, sharootada dhejiska, faashadaha, kuwa kabitaanka, daawooyinka indhaha lagu dhaqo, agabka qabowga iyo jeelka kuleelka keena
- Dharka, kabaha/buutka, jaakadaha qaboowga, galoofisyada shaqada, hoos gashiyada iyo sigsaan dheeraad ah
- Barkimo iyo bustayaal ama sheeyaasha lagu seexo
- Alaabooyinka waraaqaha ah iyo agabka nadaafada, xaashiyaha, shukumaanada, xaashiyaha musqusha iyo bacaha qashinka
- Maaskiyada busta/wajiga, ookiyaalayaasha cadceeda iyo galoofisyada caaga ah
- Kiyaawada ama biinso lagu jaro korontada iyo mindida ama aalad meelo badan loo adeegsan karo.
- Firinbi aad ugu qeylo dhaansato haddii aad u baahato caawimaad
- Koolada sharootada, xargaha dunta laba-laabka iyo qalin koobiga si aad uga sameyso qoraallo ama ku calaamadaynta alaabtaada

Ka caawi batteriga aaladaada in uu waaro muddo

- Ha damin — tableet-kaaga ama taleefankaaga ayaa isticmaala dab badan marki la damiyo oo hadana la shido, marka isticmaal habka hurdada ee "sleep mode" taa badalkeeda.
- Iska xir Bluetooth-ka iyo ogeysiisyada aadan ubaahneyn (furo ogeysiisyada gurmada degdega). Iska dami Wi-Fi marki aan la isticmaaleyn.
- Yaree iftiinka shaashada sida ugu hooseyso ee macquulka ah.
- Iska xir ablikeeshinada marki aad bogto isticmaalkooda.



Qorsho sameyso haddii ay korontada muddo dheer maqnaanayso



- ❑ Qorshee baahiyaha qoyska.
 - ❑ Soo aruurso wixi aad u baahnaan doontid si aad u ahaatid mid badqaba, cunto haysta oona istareex kujira.
- ❑ Qorshee baahiyaha xayawaanada rabaayada iyo xoolaha ladhaqdo.
 - ❑ Samee qorshaha quudinta iyo biyo-siinta haddii bamka ceelasha biyaha kasoo saaro uusan lahayn koronto.
- ❑ Qorshee baahiyaha caafimaadka si aad wali koronto ugu hesho qalabka caafimaadka inta lagu jiro maqnaashaha korontada.
 - ❑ Iska diiwaan geli **Medical Certificate program (Barnaamijkeena Shahaadada Caafimaadka)** — tani waxa ay ina ogeysiineysaa meelaha baahiyaha aadka uxunxun ay kajiraan si aanu si firfircoon kugala soo xidhiidhno maqnaanshaha korontada iyo adeegyada kale.
- ❑ Xilli hore qorshayso inaad u guurto saaxiibadaa, ehelkaaga ama meel hoy ah haddii loo baahdo, gaar ahaana haddii aad qabto baahiyo caafimaad oo u baahan koronto ama haddii aad shaqeyso ama aad waxbarato adiga oo gurigaaga jooga.
- ❑ Iskuday inaad iibsato matoor kayd ah aadna raacdo tilmaamaha shirkada samaysay si aad qaab amaan ah ugu isticmaasho.
- ❑ Haddii aad haysato soolar, iskuday inaad kudarto **beeytari keydiya**.

Qorshee xaaladaha degdega ah

Ka hel wixi xog dheeraad ah **Red Cross (Laanqayrta Cas)** iyo **ready.gov** ee sida qoyskaaga iyo gurigaaga looga dhigo kuwo badqaba.

- ❑ Qorshee wadada aad ku qixi lahayd haddii loo baahdo (eeg hagaha daadguraynta degmadaada) gaarigaagana shidaal kabuuxso.
- ❑ Soo aruurso koobiyada daabacan ee wixi aad ugu baahan tahay daadguraynta, sida kaararka aqoonsiga iyo baasaboorada, diiwaanada maaliyadda, xogta caymiska, diiwaanada sharciga, waraaqaha dhalashada iyo kaararka soosha sakuuratiga.

Ogoow waxaad leedahay

Kaqaad sawiro qol kasta oo gurigaaga ah, oo ay kujiraan garaashka iyo daashkaada, si aad u haysato liiska hantidaada haddii aad ubaahato inaad sheegato caymis. Fur armaajooyinka, koomadiinka iyo khaanadaha oo ka qaad mid kasta sawir.

Khayraadka

- 211info.org
- ready.gov
- publicalerts.org
- American Red Cross
redcross.org/get-help
- Sheegashada Portland General Electric (PGE, Korontada Guud ee Portland)
portlandgeneral.com/claims

